

Machadka Qaranka ee
Caafimaadka Dadweynaha iyo
Wasaarada
Deegaanka ee Wasaaradda
Caafimaadka, Daryeelka iyo
Ciyaaraha

Ciwaanka Lagu soo celinaayo: RIVM-DVP West, PO BOX 654, 2700 AR ZOETERMEER

iy
Waalidkooda/daryeelahooda

Lambarka Adeegga
Muwaadinta

Taariikhda: xxx 2023
Mawduuca: Tallaalka cudurka meningococcal

Lifaaq:

- Kaarka talaalka
- Cadeynta talaalka
- Xaashi ku saabsan talaalada carruurtada jira 14 sano
- Warqad ka timid Adeegyada daryeelka caafimaadka/GGD

Waalidka/daryeelaha qaaliga ahoow,

Marka aad gaarto 14 sano, waxaa lagu siin doonaa talaalka cudurka meningococcal.
Waxaa lagugu casuumi doonaa inaad qaadato talaalkaan.

Waa maxay cudurka meningococcal?

Cudurka meningococcal waa cudurka laga qaado bakteeriyada. Cudurku wuxuu keeni karaa qoorgooye iyo bakteeriyada sumeysa dhiiga. Waxaa xataa laga yaabaa inaad u dhimato. Inkastoo uusan ahayn cudurka inta badan la arko, haddana waa cudurka halis ah. Waxaad xog badan ka heli kartaa oo ku saabsan cudurka xaashida.

Halkee ka heli kartaa talaalka?

Boqshadda dhexdeeda, waxaad ka heli doontaa warqad ka socota adeegyada daryeelka caafimaadka dhallinyarada. Warqadaan waxaa ku qoran meesha iyo goorta aad heli karto talaalka. Talaalka waxaa lagaaga duri doonaa gacanta kore. Talaalku waa bilaash.

Maxay tahay inaad soo qaadato?

- Cadeynta talaalka (ee kujirta boqshadda)
- Kaarka talaalka ee MenACWY (ee kujira boqshada)

Warqadda Xogta Bukaanka

Tallaalka si fiican ayaa loo tijaabiyey. Waa badqab. Waxaa laga yaabaa inaad weli dareento waxyeelo, sida qandho fudud ama xanuun aad ka dareento gacanta. Ma jeclaan lahayd inaad oggaato waxa laga helo talaalka? Akhri warqadaha xogta bukaanka. Waxaad warqadahaan ka heli karaa bartaan rijksvaccinatieprogramma.nl/bijsluiters.


Ma jeclaan lahayd inaad oggaato xog dheeraad ah?

Oofna kuguma qasbaayo inaad qaadato talaalka. Go'aankaan waa mid adiga kugu xiran. Kala hadal waalidkaaga ama daryeelahaaga.

Waxaad xog badan ka heli kartaa xaashida.

Wax su'aalo ah ma qabtaa? Booqo rijksvaccinatieprogramma.nl ama thuisarts.nl.

Xushmad ku dheehan.



Jeanne-Marie Hament, Dhakhtar
Maamulaha Barnaamijka Qaran ee Talaalka